


# Lutinus®

(progesterone) Vaginal Tablet 100mg



Juni 2011

**FERRING**  
PHARMACEUTICALS

MEDICINE ON THE BODY'S OWN TERMS

Ferring Läkemedel AB, Box 4041, SE-203 11 Malmö, Sweden  
Telefoon: 040-691 69 00, Faakis: 040-691 69 95, info@ferring.se


## Sidee ayaad u isticmaalaysaa LUTINUS

Mar walba u isticmaal LUTINUS si waafaqsan tilmaamaha dhakhtarka. La tasho dhakhtar haddii aad shakido


LUTINUS waxa toos loo gelinaya siilka ayadoo la adeegsanayo qalabka yar ee la socda (dhexgeliyaha).




Kiniinka ka soo saar galka adiga oo qabanaya geftinka yar ee dahaarka midabka qalinka ah leh oo soo jiid. FG! Suurtogal ma ah in kor loo soo riixo kiniinka.



Xabbad kiniin ah geli meesha loogu talo galay ee afka qalabka yar. Kiniinku waa inuu si adag u fadhiyo oo aanu debeedda u soo dhicin.



Qalabka yar ee uu kiniinku ku jiro waxa la gelin karaa siilka, adiga oo taagan, fadhiya ama aad dhabarka u jiifto oo ay jilbuuhu kuu laabanyihiin. Si taxadar leh qalabka dhinacisa dhuubar kor ugu dhex geli.



Riix dabada qalabka yar si kiniinku uga fuqo. Soo saar qalabka oo si xoog ah ugu dhaqdhaq biyo kulul oo shubmaya oo u kaydi adeegsi dambe.

FG! Haddii aad illowdo in aad isticmaasho LUTINUS- qaado qaddarkii aad qaadan lahayd marka ugu horreysa ee aad xasuuusato, dabadeedna u wad sidii hore. Ha qaadan qaddar laba jibbaar ah si aad u soo bogto intii aad illowday.

Uma baahnid in aad sii jiifto marka aad dawada is geliso. Haddii aanad rabin in aad isticmaasho qalabka waxad kiniinka siilka ku gelin kartaa, faraha.

LUTINUS (progesteron) 100 mg. kiniin siilka laga qaadanayo. caddayn: Lutinus waxay tahay taageerada bacriminta ee farsamaynta uuraysiga dumarka ma dhalayska ah (ART). ATC calaanmad G03DA04. baakadayn: Gal ay ku jiraan 21 kiniin siilka laga qaadanayo. Rx. F. SPC cuboonaysiin 2010-01-15. Warbixin deheraad ah iyo warbixin ku saabsan qimaha ka fiiri [www.FASS.se](http://www.FASS.se).